

farm to TABLE

Beerta ilaa Miiska barnaamijka ah waxa laga helaa cunto iyo cunto fudud daray ah oo deegaanka ah oo caruurta ka hesho ku jirta daryeelkan ilmaha ama kahor/kadib barnaamijka daryeelka ilmaha. Marka la siiyo cunto tayo saraysa, ilmahaagu waxa uu ka qayb geli karaa beerista iyo hawlaha nafaqada si uu ugu fahmo halka cuntadu ka timid iyo sida jidhkiisu u caafimaad qabayo ee uu u xooganaanayo.

Siinta cunto daray ah oo laga soo jaray beeraha deegaanka ilmahaaga waxay ka caawinaysaa:

Inuu Noqdo Arday Xoogan

- Caruurta waxay si wanaagsan wax u bartaan marka ay nafaqada jidhkoodu wanaagsan tahay.
- Cuntadu waxaa weeye dariiqa ugu fudud ee loo xidhiidhin karo sayniska, xisaabta, joqraafiga iyo qoraalka waxbarashada maalin kasta.

Dhismaha Habdhaqan Caafimaad Qaba oo Nolasha oo Dhan ah

- Samaysashada habdhaqan wax cunis wanaagsan iyada oo la yar yahay waxay gacan ka gaysataa caafimaadka nolasha oo dhan iyo in laga hortago xanuunada sida macaanka iyo beer xanuunka.

Ku Xidhnaadaan Bulshadooda

- In sida qoyska wax loogu cuno, dugsiya iyo guriga, waxay dhiiri gelisaa wada shaqaynta iyo in la qoto dheereeyo xidhiidhka dadka u dhaxeeya.
- In la ogaado meesha ay cuntadu ka timid waxa ay ku xidhiidhinaysaa ilmahaaga dhulka iyo beeraha ay cuntadu ka baxdo.

Beerta ilaa Miiska waxa maalgelisa Cashuurta Sharaabka Macaan ee Magaalada Seattle waxaana weeye iskaashi bulshada ah oo u dhaxeeya:



Seattle



FARMSTAND
LOCAL FOODS

NOURISHIAN
FOR LIFE



SOLID
GROUND
Building community to end poverty



tilth
ALLIANCE

